Casharka 8

1. Miyaa Ilaah dunidan u diyaariyey malaa'igo ama shayddaanka iyo jiniyadiisa?
-Maya.

2. Yuu Ilaah dunidan u sameeyey?
-Ilaah wuxuu dunidan u sameeyay dadka.

3. Markii la eego, waxa waliba ee Ilaah uumay, yaa ugu sharaf badan ama ugu muhiimsan?
-Dadaka.

4. Maaddama dadku ay yihiin kuwa ugu sharafta weyn leh intii Ilaah khalqay, sidee buu Ilaah dadka u samayn doonaa?
-Ilaah wuxuu go'aansaday in dadka uu ka sameeyo Araggiisa.

5. Qaybaha Aragga Ilaah aynu ka raacnay ama Ilaah laynagala mid dhigayo waa kuwee?
-Waa xagga maanka, dareenka, iyo goaan-qaadashada.

6. Muxuu Ilaah inaga doonayaa inaan samayno?
-Ilaah wuxuu dadka ka doonayaa inay ka fikiraan wax waliba ee wanaagsan.
-Ilaah wuxuu doonayaa oo kale in dadku ka fikiraan Isaga ah Abuuraha.

7. Maxaa Ilaah inoo siiyey dareenka?
-Wuxuu inoo siiyey si aynu isaga ku jeclaanno awgeed.

8. Muxuu Ilaah inaga doonayaa inaynu go'aanqaadashadayada ku samayno?
-Wuxuu doonayaa inaynu ku dooranno ama guddoonno wax waliba ee inoo wanaagsan.
-Ilaah wuxuu doonayaa in dadku isaga goddaamaan ama doortaan, maaddaama ay go'aan leeyihiin.

9. Imisa qof ayuu Ilaah uumay bilowgii dunida?
-Wuxuu uumay hal nin iyo hal naag.

10. Ninkii ugu horreeyey maxaa la oran jiray?
-Aadan.

11. Kaddib markii Ilaah abuuray Aadan, Muxuu Aadan masuul uga dhigay?
-Waxaa Ilaah Aadan Mas'uul uga dhigay dhulka oo dhan.

12. Dunidusidee bay u ekayd bilowgii?
-Bilowgii, geed qodax leh ma jirin.
-Bilowgii, cagaar ama naq abuurka la dhalan jiray ma lahayn.
-Bilowgii, xayawaanka addka ma ayan qaniini jirin.
-Bilowgii dadku shar ma ayan ahayn.

13. Yaa arkayey Ilaah markii uu dinida u uumay si kaamol ah?
-Malaa'igaha Ilaah, Shayddaanka iyo jinniyadiisa.

14. Miyaa Shayddaanka iyo jinniyadiisa ay ku faraxsanaayeen in Ilaah abuuray duni kaamil ah?
-Maya.

-Miyaa Ilaah dhammeeyey abuuristii samada iyo dhulka?
-Haa.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 2:1

1-Samada iyo dhulkuna way dhammaadeen, iyo waxa badan ee ku jira oo dhammuba.

-Ilaah wuxuu dhammeeyey abuuristii uu abuurayey Samada iyo Dhulka.

-Wuxuu kaloo dhammeeyey shaqadii aya hayd inuu sameeyo.

-Mararka qaarkood dadku shuqul bay bilaabaan, laakiin ma dhammeeyaan.

-Dadku mararka qaarkood waxay bilaabaan inay guryo dhisaan, laakiin haddana ma dhammeeyaan.

-Mararka qaarkood habluhu waxa bilaabaan hawl ay dhar ku tolayaan, ama ay dembiilo ku tolayaan, haddana shaqada ma dhammeeyaan.

-Mararka qaarkood dadku hawlaha ay ku jiraan ama mashruucyada sooma kaamilaan iyadoo ay ugu wacan tahay dadka oo ka joojiya ama ka carqaladeeya hawshooda.

-Habase yeeshee Ilaah lama mid ahan sida dadka oo kale..

-Markii Ilaah bilaabo shuqul, shuqulkiisa uma joojiyo iyadoo ay ugu wacan tahay in shuqulku dhib badan yahay.

-Markii Ilaah bilaabo shuqulkiisa, shaqadiisu ma istaagto iyadoo ay ugu wacan tahay dad shuqulkiisa carqaladaynaya awgeed.

-Markii Ilaah shuqul bilaabo, Ilaah mar waliba shuqulka wuu



dhammeeyaa.

-Maxaa shaqa waliba ee Ilaah bilaabo aanay qabyo u noqon?
-Waxaa ugu wacan in Ilaah aanu is-beddelin.

-Waxaa kaloo ugu wacan inaanay jirin wax Ilaah ka istaajin kara inuu hawshiisa kaamilo.

-Markii Ilaah bilaabo shuqul, miyaa Shayddaanka amase jinniyada ay joojiyaan hawshiisa?
-Maya.

-Markii Ilaah ballan-ku-qaado inuu wax sameeyo, mar aliba sidii uu ku ballanqaaday bay ahaanaysaa.

-Bal aynu imminka idiin ahrinno wixii Ilaah sameeyey kaddib markii uu dhammeeyey abuurista dhulka iyo Samada.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 2:2-3

2-Maalintii toddobaadna Ilaah wuu dhammeeyey shuqulkiisii uu sameeyey; oo maalintii toddobaad ayuu ka nastay shuqulkiisii uu sameeyey oo dhanba.
3-Oo Ilaah wuu barakadeeyey maalintii toddobaad, qoduusna wuu ka dhigay; maxaa yeelay, maalintaas ayaa Ilaah ka nastay shuqulkiisii uu sameeyey ee ahaa abuuridda oo dhan.

-Maaa Ilaah u nastay maalintii toddobaad?

-Miyaa Ilaah daalay?
-Maya.

-Maxaa Ilaah u daali waayey kaddib markii uu wax waliba abuuray?

-Waxaa ugu wacan in Ilaah aanu daalin.

-Waxaa kaloo ugu wacan in awoodda Ilaah aanay dhammaad lahayn.

-Maxaa ugu wacan in Ilaah nasto maalintii toddobaad?

-Waayo Ilaah wuxuu dhammeeyey wax waliba ee ay ahayd inuu abuuro.

-Ilaah imisa maalmood ayuu dunida ku abuuray?
-Lix maalmood oo qura.

-Ilaa iyo imisa maalmood bay qaadataa in guri lagu dhiso?

-Laga yaabo inay qaadato ilaa iyo lix bilood.

-Bal waxaad eegtaa wax waliba ee Ilaah ku abuuray lixda maalmood.

-Ilaah oo keliya ayaa samada iyo dhulka ku uumi karay lix maalmood oo qura.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 2:4b & 6

4-Kuwanu waa Bilowgii samda iyo dhulka kolkii la abuuray iyaga, maalintii Rabbiga Ilaaha ahu sameeyey dhulka iyo Samada.
6-Laalkiin ceeryaamo baa dhulka kor uga soo bixi jirtay, oo



wraabin jirtay dhulka dushiisa oo dhan.

-Markii Ilaah abuuray dhulka, roob dhulka kuma di'i jirin.

-Haddii dhulku uusan roob lahay bilowgii, sidee baa Ilaah dhulka ku waraabin jiray?

-Ilaah wuxuu dhulka ku waraabin jiray ceeryaabo, Ciidda ka oo bixi jirtay.

Bal aynu akhinno Billowgii 2:8

8-Oo Rabbiga Ilaah ahu beer buu ka beeray xagga bari oo Ceeden; oo halkaasuuna geeyey ninkii uu sameeyey.

-Bilowgii, Ilaah wuxuu sameeyey Beer qurux badan.

-Maxaa la oran jiray beertii Ilaah sameeyey?
-Waxaa la oran jiray Beer Ceeden.

-Yuu u beeeray ama sameeyey Ilaah beer Ceeden?
-Aadan buu u sameeyey.

-Muxuu Ilaah beertan ugu beeray Aadan?
-Waao Ilaah Aadan aad buu u jeclaa.

-Markii Ilaah beeray ama sameeyey beer Ceeden, wuxuu nebi Aadan keenay Beer Ceeden.

-Miyaa Ilaah nebi Aadan weyddiistay in Aadan Beer Ceeden la dejiyo iyo in kale?

-Maya.

-Maxaa Ilaah Aadan u weyddiin waayey, in la dejin karo nebi Aadan Beer Ceeden?

-Waayo, Ilaah wuxuu uumay Aadan, Aadanna Ilaah baa lahaa.

-Maaddaama Ilaah abuuray dadka oo dhan, yaa iska leh dadka oo dhan?

-Dadka oo dhan Ilaah baa iska leh.

-Maaddaama Ilaah wax waliba abuuray, yaa wax waliba iska leh?

-Wax waliba Ilaah baa iska leh.

-Beer Ceeden dhexdeeda, waxaa Ilaah ku beeray laba geed oo khaas ah.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 2:9b

9-Beerta dhexdeedana wuxuu ka soo bixiyey geedkii nolohsa iyo geedkii aqoonta wanaagga iyo xumaanta.

-Muxuu ahaa geedkii Ilaah ka dhex beeray Beer Ceeden?

-Wuxuu ahaa geedka noosha.

-Maxaa Ilaah uga dhex beeray Geedka Nolosha Beer Ceeden dhexdeeda?

-Ilaah wuxuu doonayey in Aadan cuno geedka nolosha oo weligiis



noolaado.

-Ilaah Aadan kuma khasbin inuu cuno Geedka nolosha.

-Ilaah wuxuu doonayey in Aadan isagu sameeyo wixii la wanaagsan ama doorto.

-Ilaah wuxuu doonayey in nebi Aadan doorto inuu cuno geedka Nolosha.

-Muxuu ahaa magaca geedkii labaad ee lagu beeray bartamaha Beer Ceeden?

-Geedkaasu wuxuu ahaa geedka aqoonta Wanaagga iyo xumaanta.

-Waayo Geedka aqoonta Wanaagga iyo xumaanta, Ilaah baa u diiday Aaadan inuu cuno.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 2:16-17a

16-Rabbiga Ilaaha ahuna wuxuu ninkii ku amray isagoo leh, Geed kasta oo beerta ku yaal wax baad ka cuni kartaan.
17-Laakiin geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta waa inaanad waxba ka cunin.

-Muxuu haddaba ahaa amarkii Ilaah Aadan siiyey markay joogto Geedka Wanaagga iyo Xumaanta?

-Ilaah wuuu Aadan ku amray inaanu cunin mirihiisa.

-Ilaah wuxuu garanayaa waxa xun iyo waxa wanaagsan.

-Ilaah wuxuu kaloo garanayaa in wax waliboo wanaagsan ay wanaagsan yihiin, oo wax waliba ee xunna ay xun yihiin.

-Bilowgii, Aadan wuxuu garaneyey oo keliya waxa wanaagsan.

-Bilowgii, Aadan ma uusan garanaynin wax waliba ee xun.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 2:17b

17-Waayo, maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doonaa.

-Haddii Aadan cuno miraha Geedka aqoonta xumaanta iyo wanaagga, maxaa dhacaya?

-Aadan wuu dhimanayaa.

-Waa maxay dhimasho?

-Badanaa dadku waxay rumaysan yihiin inay jirto hal dhimasho.

-Ilaahna wuxuu leeyahay waxaa jira saddex nooc oo dhimasho ah.

-Dhimashada kowaad waa kala dhaqaaqidda dadka iyo Ilaah?

-Maxaa kala dhaqaaqidda Ilaah iyo dadka ay u keentaa dhimasho?

-Waayo Ilaah oo keliya ayaa nolosha bixiya.
-Waayo nolosha oo dhan waxay ka timaaddaa Ilaah.

-Shayddaanka wuu dembaabay, isaguna wuxuu ka dhaqaaqay Ilaah.



-Haddii aadan Ilaah addeeci waayey, Aadan wuxuu ka go'ayaa Ilaah.

-Dhimashada labaad waxaa weeye kala dhaqaaqidda jidhka iyo nafta.

-Taasina waxaa weeye dhimashada dad badan  ay garanayaan.

-Haddii Aadan Ilaah inuu addeeco diidi lahaa, Aadan jidhkiisu wuu dhiman lahaa.

-Dhimashada saddexaad waa kala dhaqaaqidda abaadanka ah marka qofku uu galo naarta.

-Haddii Aadan Ilaah addeeci waayey, isna waxay ahayd in Ilaah laga dhaqaajiyo, oo jidhkiisuna dhinto, oo welibana ruuxiisu galo naarta.

-Maxaa keenay in Ilaah Aadan ku amro inaanu cunin Geedka Aqoonta Wanaagga iyo Xumaanta?

-Waayo Ilaah baa sameeyey Aadan.
-Waayo Ilaah wuxuu leeyahay Aadan.

-Haddii qofi sameeyo yaambo, miyaanu qofkii sameeyey iska lahayn?

-Haa.

-Haddii qof dumar ahi ay samaysato dheri, miyaanay qofkaa dumarka ahi lahayn dherigaas?

-Haa.

-Haddii wiil ama gabar yar ay samaysato boobmbale, miyaanu boombalaha iska lahayn cunuggii sameeyey?

-Haa.

-Waayo Ilaah wuxuu abuuray Aaddan, Aadanna wuxuu leeyahay Ilaah.

-Waayo Ilaah baa Aadanna abuuray, oo Ilaah Aadan wuu xukumi karaa ama amri karaa.

-Haddaba miyey hagaagsan tahay in Ilaah amro Aadan?

-Haa.

-Maxaa kenay in Ilaah amro Aadan?

-Waayo Ilaah wuu ka xigmad badnaa Aadan.

-Miyaa qofka caadiga ah ka xigmad badan yahay nin dhallinyaro ah?
-Haa.

-Miyaa haweenay duq ahi ka xigmad badan tahay inan hadda soo kacday?
-Haa.

-Miyey haddaba ahmiyad leedahay in nin dhallinyaro ah uu dhegaysto dadka waaweyn?
-Haa.



-Maaddaama Ilaah ka xigmad badnaa Aadan, way ahmiyad ballaarnayd in Aadan maqlo Ilaah.

-Maxaa Ilaah u doonayey inuu dhegaysto ama maqlo Aadan.

-Waayo Ilaah wuxuu garanayaa wax waliba ee Aadan u xun.

-Waxaa kaloo Aadan uu doonayey inuu daafaco Aadan.

-Odayaasha  waaweyn waxay aad u garanayaan wax waliba ee u wanaagan iyo wax waliba ee u xun wiilasha dhallinta yar ama barbaarrada.

-Hablaha waaweynna waxay aad u garanayaan waxa u wnaagsan gabdhaha yar yar iyo kuwa waaweyn.

-Yaa garanaya wax waliba ee wanaagsan iyo wax waliba ee u xun nebi Aadan?

-Ilaah.

-Ilaah wuxuu garanayaa wax waliba.
-Ilaah wuxuu doonayey in Aadan Isaga maqlo.

-Ilaah wuxuu kaloo doonayaa in dadka oo dhani ay maqlaan Isaga.

-Runta Rabbiga waxay ku qoran tahay Baybalka.

-Ilaah wuxuu doonayaa in dadku maqlaan wax waliba ee uu kitaabkiisa qoduuska ah ku qoray.